

somali

Macluumaad ku saabsan xiisadaha xirfadaha dareenka iyo badbaadada oo ku socda guryaha ardeyda.

Carruurta waxaay xaq u leeyihiin inay u koraan si amni ah - an wada xoojino xirfadaha dareenka iyo badbaadada ee carruurta

Shaqada dadka waawayn waa in ay carruurta siiyaan daryeelka iyo badbaadada ay u baahanyihiin oo ay ka difaacan arrimaha anan iyaga caalamkooda ku habboonayn ee dhib u keeni kara amnigooda iyo koriinkooda deggan. Carruurta waxay u nuglaadaan marka ay ku macaamilayaan caalamka miidhiyada kala duwan dhibaateyn, qashqashaad iyo waxyeellayn intii hore ka badan. Miidhiyada iyo xayaaysiisyadu waxay jinsiyeeyaan carruurta. Internetka iyo soosha miidhiyadu waxaay suuro galiyaan in ilmaha marba marka ka dambeysa da'ihii hore ka sii yar lala macaamiilo iyada oo la caqli xadayo, waana wax sii badanaya.

Kormeerka waalidku ma gaadhi karo dhinac kasta marka ay carruurta korayaan ee nawaaxiga ay ku noolyihiin uu sii balaadhanayo. Inkastoo mas'uuliyadda amniga ilmuhu uu markasta saaranyahay inaga oo dadka waawayn ah, carruurtuna way u baahanyihiin aqoonta iyo xirfadaha ku caawin kara inay daryeelaan nafhooda iyo amnigooda. Carruurta waa in ay ogaadaan inay xaq u leeyihiin inay si amni ah ugu noolaan karaan guryahooda iyo bannaanka guryahoodaba. Xirfadaha amnigu waxay ku saleysanyihiin xuquuqda carruurta waxaayna carruurta xaq u leeyihiin inay bartaan oo ay noloshooda qayb ka noqdaan.

Xirfadaha dareenka iyo amniga waxaa lagu xoojinayaa xirfadaha ay carruurta leeyihiin ee ay isku difaacan una ilaaliyaan xuduudahooda si anan loo dhibaateyn oo anan loo qashqashaadin iyo marka in la waxyeelleeyo la isku dayo. Barbaarinta ku saabsan xirfadaha dareenka iyo amnigu waa kuwo sii kobcinaya awoodaha ilmaha iyo hababka ay uga dabaalan karaan dhibaatooyinka. Xirfadaha dareenka iyo amniga waxaa lagu xoojinayaa kalsoonida ilmaha, inay naftooda qiimeyaan, wadamacaamilka ay dadka la leeyihiin iyo xidhiidhada wanaagsan ee saaxibtinimo. Isla markaas waxaa la horumarinayaa awoodaha amniga dhijitaalka. Waxaa carruurta lagu hagayaa oo lagu dhiiri galinayaa inay dadka waawayn ula tagaan waxyaabaha walwalka ku keena.

Xiisadaha nidaayada la adeegsado waa kuwo carruurta ku habboon oo ka qaybgalinaya waxqabadka wadajirka ah. Mawduucyada barbaarinta awoodaha dareenka iyo amniga loo isticmaalayo waxay qayb ka yihiin manhajka waxbarashada waxayna kobcinayaan aqoonta baaxadda leh. Xiisadaha waxaa ku gudajira casharo ka qaybgalinaya waalidka oo ujeedadu ay tahay in si wadajir ah loo sameeyo. Kuwaax waxaa loo adeegsanayaa in lagu horumariyo wada macaamilka furan ee waalidka iyo ilmaha ka dhaxeeya iyo wadashaqaynta iskoolka iyo guryaha. Xirfadda amniga ugu muhiimsan waa in xidhiidh furan lala leeyahay qoyska.

Wadashaqayntena waxaan ku horumarin karnaa barbaarinta amniga ah ee carruurta.

somali

Salaan,

Waxaan helay warbixinta ku saabsan bilaabidda xiisadaha xirfadaha dareenka iyo amniga.

Saxeexa waalidka:
